

Dhammaan  
waxaad uga  
baahan  
tahay inaad  
ka ogaaato  
qiimeynta  
da'da



Tan iyo 19-ki Janaayo 2022 Xafiiska Taageerada Magangalyada Yurub ee (EASO) ayaa noqday  
Hay'adda Midowga Yurub ee Magangalyada (EUAA)



Hay'adda Midowga Yurub ee Magangalyada (EUAA) ama qof kasta oo ku adeega magaca EUAA  
midna mas'uul kama aha isticmaalka laga yaabo in loo adeegsado maclumaadka soo socda.

Luxembourg: Xafiiska Daabacaadaha ee Midowga Yurub, 2021

Daabac	ISBN 978-92-9485-863-4	doi: 10.2847/1255	BZ-06-20-110-EN-C
PDF	ISBN 978-92-9485-842-9	doi: 10.2847/443893	BZ-06-20-110-EN-N

© Hay'adda Midowga Yurub ee Magangalyada, 2022

Dib usoo saarista waa la oggolyahay waa haddii la magacaabay isha.

Wixi kasta ee ah isticmaalka ama dib usoo saarista sawiro ama waxyaabo kale oo aan hoos imaaneynин  
xuquuqda daabacaada ee EUAA, waa in si toos ah ogolaanshaha looga raadsadaa ciddi haysata  
xuquuqda daabacaada.

Dhammaan  
waxaad uga  
baahan  
tahay inaad  
ka ogato  
qiimeynta  
da'da



# HORDHAC

Canug kasta waxa uu **xaq uleeyahay aqoonsi**. Aqoonsi micniiisu waxay tahay inaad kaliya aadan lahayn magac, laakiin sidoo kale aad leedahay **taariikhda iyo goobta dhalashada** iyo dukumeenti sheegaya arrintan.

Marka ay dhalinyaradu Yurub yimaadaan, inta badan **malahan dukumeenti** cadeynaya aqoonsigooda iyo da'dooda, sida warqad dhalasho ama baasaboor. Tani waa marka ay **masuuliyiintu ka codsadaan** inay **maraan qiimeynta da'da** si loo go'aamiyo inay caruur yihiiin iyo in kale.

Gudaha Yurub, waxaa lagugu tirinaya **ilmo** marki aad **kayar tahay 18 sano** oo da'da ah. Ka carruur ahaan, waxaad xaq u leedahay qaabab ilaalin oo gaar ah.

Buug-yarahaan ayaa sharaxaya sida inta badan qiimeynta da'da looga sameeyo wadamada Yurub. Habraacyada ayaa laga yaabaa inay xoogaa isbadelaan iyadoo ay ku xiran tahay meesha saxda ah ee aad ka joogto Yurub.





Waxaad akhrin kartaa buug-yarahan oo uu la socdo **muuqaal-gacmeed** kusaabsan **qiimeyn ta da'da carruurta ee ay soo saartay Hay'adda Midowga Yurub ee Magangalyada (EUAA)**. Muuqaal-gacmeedka wuxuu luuqado badan kaga baxaa kanaalka YouTube-ka EUAA.

Haddii adiga ama saaxiibadaa aad leedihiin taleefoonka gacanta, iskaan garee QR code-kan oo si toos ah u gal muuqaalka



# WAA KUMA?

**Ahmed** iyo **Samira** ayaa dhawaan labadooduba yimid Yurub iyaga oo uusan la socon waalid. Maadaama aysan masuuliyiintu hubin da'dooda, labadaba waxaa laga codsaday inay maraan qiimeynta da'da. Waxay hadda sugayaan in la qiimeeyo da'dooda.



*Ahmed*



*Samira*

**Doktoor Min** waa dhakhtarada carruurta.. Waxay baartaa carruurta oo waxay siisaa maamulka warbixin ku saabsan natijjooyinka meeshi looga baahdo.



*Diktoor Min*

**Diktoor Sam** waa khabiir ku takhasusay raajada kasoo si dhow ula shaqeeya Diktoor Min. Wuxuu sawiro ka qaadaa lafaha loo yaqaano Raajada. Waxaa kuwaan mararka qaar loo isticmaalaa in lagu ogaproject da'da.



*Diktoor Sam*

# *Paula*

**Paula** waa sarkaalad xirfad gaar ah u leh wareysiga carruurta iyo dhalinyarada Caadi ahaan waxay ka mid tahay dadka ugu horreeya ee la kulma oona la hadla kuwa magangalyada ka codsanaya marka ay imaanayaan Yurub.



# *Tony*

... waa anigo ah **Tony**, waxaan ahay mas'uul waxaana kuu sharixi doonaa wax kasta oo aad ooga baahan tahay inaad ka ogaato qiimeynta da'da.

# *John*

**John** waa xeeldheere qaabilsan cilminafsiga carruurta. Wuxuu ka caawinayaan hannaanka qiimeynta da'da isagoo la hadlaya oo su'aalo waydiinaya dhalinyarada imaanayaan Yurub. Wuxuu xog ka siiyaa maamulka meeshi looga baahdo.




# TONY – MASUULKA

Qofka **masuulka** waa qof **loo xilsaaray carruurta** imaaneysha  
**iyaga oo uusan la soconin waalidiin ama daryeele sharci.**

Waddamada qaar mas'uuliyiinta waxaa sidoo kale loo yaqaanaa wakiillo.

**Masuuliyiinta aniga oo kale ah ayaa halkaas u joogo inay ka caawiyaan jawaabaha dhammaan su'aalaha laga yaabo inay carruurtu qabaan.** Tusaale ahaan, sida ay u aadi karaan dugsiga, halka ay ku noolaan karaan, ama sida loo arko dhakhtar haddii aysan caafimaad qabin. Wuxaad ka codsan kartaa mas'uulkaaga si aad caawimaad ooga hesho dhammaan mawduucyadaan.

Hadda waxaan sharaxaad ka bixin doonaa waxa ay tahay qiimeynta da'da iyo sababta ay muhiim u tahay.




# MAXAA DA'DA LOO QIIMEEYAA?

Marka saraakiisha sida Paula ay ka shakiyaan da'da qofka dhalinyarada ah ee soo galaya Yurub oo aysan jirin wax dukumeenti ah oo caddeynayo taariikhda dhalashada, waxay ku weydiin karaan inaad marto qiimeynta da'da.

**Qiimeynta da'du waa hab qiyaas ahaan  
lagu ogaanayo inta da'daadu tahay.**


Qiimeynta noocaan ah ka dib waxaad yeelan doontaa dukumeenti si rasmi ah u sheegaya da'daada. Haddii aad **kayar tahay** da'da **18 sano**, waxaad tahay **ilmo**. Dadka **kaweyn 18 sano** waa **dad waaweyn**.



# MA HUBTID MIYAA?

In da'daada lagu qoro dukumeenti rasmi ah ayaa aad muhiim u ah.

Ka ilmo ahaan, waxaad heli doontaa taageero gaar ah inta uu socdo hannaankaagakaaga magangalyada. Da'daada ayaa go'aamin doonta meesha aad ku noolaaneyso iyo cidda aad la noolaaneyso. Waxay ka caawin doontaa mas'uuliyiinta inay go'aansadaan, tusaale ahaan, haddii ay tahay inaad yeelato mas'uul iyo haddii kaleba, dugsiga iyo fasalka aad ku biireyso iyo waxyaale kale.




# BIXINTA OGGOLAANSHAHA

Saraakiisha ayaa sida caadiga ah ku weydiin doona inaad ogoshahay sameynta qiimeynta da'da. **Aqbalitaankaaga** ayaa badanaa **loogu yeeraa bixinta oggolaanshaha** si loo sameeyo qiimeynta da'da

**Waxaad xaq u leedahay inaad su'aalo weydiiso marka aanay wax kuu caddayn. Waxaad xaq u leedahay inaad codsato turjumaan ama fasire haddii aadan fahmi karin** luuqada ay saraakiisha isticmaalaan.

**Turjumaanka ama fasiraha waa qof kuhadli kara luuqad aad fahmi kartowuxuuna** kaa caawin doonaa inaad xiriirto masuuliyiinta marki loo baahdo. **Hawshoodu** waa inay **si sax ah u turjumaan** waxa adiga iyo saraakiisha aad ku hadashaan.

Markaad fahamto waxa lagaaga baahanyahay inta lagu jiro habraaca qiimeynta da'da iyo sababta ay muhiim kuugu tahay inaad ka qayb qaadato, waxaad si kalsooni leh u siin kartaa ogolaanshahaaga.






# QIIMEYNTA DA'DA HABRAACA

Kuwani waa afarta siyaabood ee ugu badan ee lagu qiimeeyo da'da qofka dhalinyarada ah.

## 1. WARESIGA QIIMEYNTA DA'DA EE UU LA YEESHO SARKAAL U TABABARAN SIDA PAULA

Saraakiisha sida Paula **ayaa eegi doonta dhammaan dukumeentiyada** aad iyaga la wadaagtay. Tusaale ahaan, dukumeentiyaasha aad ka keentay dalkaaga ama waraaqaha aad heshay markii aad safreysay. Wawa kale oo laga yaabaa in lagu weydiyo su'aalo ku saabsan noloshaada ka hor inta aadan Yurub imaanin. Su'aalahsan waxaa ka mid noqon kara, tusaale ahaan, haddii ama meesha aad ka dhigatay dugsi, inta walaalo ah oo aad leedahay, su'aalo ku saabsan qoyskaaga.

**Jawaabahaaga daacada ah** ayaa ka caawin doona saraakiisha sida Paula inay ogadaan qiyaasta inta da'daadu tahay. Tan kadib, Paula waxay gaari doontaa go'aan. Haddii ay weli shaki qabto oo aanay hubin da'da ay tahay in la qoro, ayadoona ku xidhan waddanka aad joogto, waxay ku weydiin doontaa inaad la kulanto cilmi-nafsi yaqaan ama shaqaale bulsho oo takhasus leh. Waxay markaas kadib ku weydiin doonaan dhowr su'aalood oo dheeraad ah oo faahfaahsan.



## 2. LAKULANKA CILMU-NAFSIGA ILMAHA, SIDA JOHN AMA SHAQAALA BULSHO

Waxaad la kulmi doontaa qof sida John, kasoo ah **khabuur ku takhasusay cilmi-nafsiiga carruurta**.

Wadamada qaar waxaad taa badalkeeda la kulmi doontaa shaqaale bulsho.

Dhakaatiirta cilmi-nafsiiga carruurta iyo **shaqaalaha bulshadu** waxay aqoon u leeyihiin sida si dagan carruurta loola hadlo. Waxay ku waydiin doonaan waxyaabo guud oo ku saabsan noloshaada ama qoyskaaga joogo dalkaagi hooyo. Wuxuu laga yaabaa inay ku waydiyaan waxaad jeceshahay inaad samayso iyo waxa aanad jeclayn gabi ahaanba. Waxaa laga yaabaa inay ku weydiyaan saaxiibadaada ugu fiican iyo inta aad taqaanay ama ay kaa bartaan dhacdooyinkii ka dhacay gurigaaga dalkaagi hooyo.

**Xasuusnow inaad had iyo jeer waydiiso su'aalo** marki aadan waxbo fahmin aad ubaahan tahay in wax laguu kala cadeeyo.







### 3. BAARITAANKA JIDHKA EE UU DHAKHTARKU KU SAMEYNAYO CARUURTA

Wadamada qaarkood, waxa laga yaabaa inay ku weydiyaan inaad aragto dhakhtarka carruurta, dhakhtar caafimaad sida Diktoorad Min oo ku takhasustay la shaqaynta carruurta. Booqashadan caafimaad waxa laga yaabaa inay bedesho la kulanka cilmi-nafsiiga carruurta ama shaqaale bulsho.

Dhakhaatiirtu waxay eegi doonaan miisaankaaga, dhererkaaga, laga yaabo ilkahaaga waxayna ku weydiin doonaan guud ahaan sida aad dareemayo. Waxaa laga yaabaa inaad bixiso qaar ka mid ah dharkaaga waqtiga baaritaanka. Haseyeeshee, waa inaadan weligaa si buuxda dharka aadan isaga wada siibin. Xasuusnoow, haddii qof ku weydiyo inaad sidaas sameyso, waxaad dhihi kartaa **MAYA**.

Wadamo badan, waxaad ikhtiyaar uleedahay inaad codsato dhakhtar dheddig ama lab ah, taasoo ku xidhan qofka aad ku qanacsan tahay iyo qofka la heli karo.



## 4. RAAJADA DHAQAATIIRTA SHUCAACA LOO TABABARAY LA SHAQEYNTA CARUURTA

Dhakhaatiirta caruurtu waxay si dhow ula shaqeeyaan dhakhaatiirta kale, sida dhakhaatiirta shucaaca sida Diktoor Sam. Dhakhaatiirta shucaaca waxaa ay ku takhasuseen qaadista sawirada lafaha iyaga oo wata mishiin weyn oo loo yaqaan mashiinka raajada. Mashiinka raajada wuxuu u shaqeeyaa sida kamarad weyn wuxuuna sawir ka qadi karaa lafaha iyadoo lasii dhexmarinayo maqaarkaada.

Wax dhib ah maleh, **kaqaadista sawirada noocaan ah** lafahaaga **waxbo uma dhimo** haba yaraatee. Dhab ahaantii, waxba ma dareemi doontid. Haseyeeshee, raajooyinka waa in aanan la sameynin inta badan, sababtoo ah waxay ku lug leeyihii shucaac.

Iyadoo ay ku xiran tahay dalka aad joogto, dhakhtarku wuxuu marin karaa raajo cumaacumta gacantaada, lafahaaga ama mararka qaarkood ilkhaaga. Sida ay lafahaagu isugu xidhan yihiin iyo sida ay sawirka ugu yaallaan ayaa ka caawin karta dhakhaatiirta inay qiimeeyaan da'daada.



# Xasuusnow



Iyadoo ay ku xiran tahay dalka aad joogto, qiimeynta da'da waxay noqon kartaa:

- **wareysiga qiimeynta da'da,**
- **wareysi lala yeesho dhakhtarka carruurta ama shaqaale bulsho,**
- baaritaan jireed **oo uu sameeyo dhakhtarka carruurta,**
- ama **baaritaanka Raajitada oo uu sameeyo dhakhtarka shucaaca.**

Mararka qaarkood, qiimeynta da'du waa isku-dafka qaar ka mid ah habraacyadaan kala duwan.

**Haddii aad su'aalo qabto**, waa inaad hadashaa oo aad **weydiisaa!** Dadka ku lugta leh hannaanka qiimeynta da'da, sida Paula, John, Diktoor Min ama qof kale, ayaa ay tahay inuu ka jawaabo su'aalahaaga. Haddii ay dhibaato kaa haysato fahamka luuqaddooda, u sheeg iyaga. Wuxuu ay isku dayi doonaan intii karaankooda ah inay helaan qof kuugu tarjuma luuqadda aad ku qanacsan tahay.

# SANDUUQA QORAALADA

QOR SU'AALAHADHEE WELI LAGA YAABO INAAD QABTO  
OO KUSAABSAN QIIMEYNTA DA'DA EE U BAAHAN  
IN LAGUU KALA CADDEEYO.



# NATIIJOOYINKA QIIMEYNTA DA'DA

Marka hannaanka qiimeynta da'da lasoo gabagabeeyo kadib, wadamada intooda badan **waxaa kusoo ogeysiin doona** shaqaale bulsho **waxaadna heli doontaa warqad uu kuqoran yahay go'aanka** kusaabsan da'daada. Warqadani waa muhiim, markaa ku xafid meel aamin ah.

Haddii dhammaadka hannaanka saraakiisha **ay wali shaki kaqabaan** inaadkayar tahay **18 sano** ama **kaweyn tahay 18 sano**, waa inay doortaan **da'da yar**.

Tan waxaa la dhahaa **FAA'IIDADA SHAKIGA!**



# MAXAAD SAMEYN KARTAA HADDII AADAN KUQANCIN GOA'NKA?

Mararka qaar, natiijooyinka qiimeynta da'da ayaa laga yaabaa inay noqdaan xoogaa mid ka weyn ama ka yar sida dhabta ah ee aad tahay.



Haddii **aadan ku raacsanayn go'aanka** kusaabsan da'daada, kala hadal masuulkaaga ama sarkaal ka shaqeeya meesha aad ku nooshahay, tusaale ahaan sarkaal sharci, sarkaalka soo dhaweynta ama shaqaale bulsho. Waxay kaa caawin doonaan inaad diyaariso dukumeenti la yiraahdo racfaan.

**Gudbinta racfaanka** waxay micnihiisu tahay inaad **dood ka qabto ama aad ka hor imaado go'aanka qiimeynta da'da**. Wadamada intooda badan, waa inaad sidan ku samaysaa maalmo gudahood ka dib marki aad hesho warqadda go'aanka qiimeynta rasmiga ah ee da'da. Xaqiji in **aadan sugin waqtidheer** oo isla markiiba aad raadsato caawimaad si loo saxo go'aanka!

19 miyaa  
jirta?




# DANTA UGU FIICAN EE CANUGA

Saraakiishu waa inay hubiyaan in dhammaan go'aamada ay gaaraan ay **u fiican yihiin danta canuga.**

**Tixgelinta danaha u fiican canugakaliya** ma ahant muhiim marka ay timaado da'da, laakiin sidoo kale waxay muhiim tahay marka la go'aaminayo meesha uu canugu ku noolaanayo iyo cidda uu la noolaanayo, dugsiga ay tahay in canugu dhigto, iyo waxyaale kale oo badan.

Mas'uliinta aniga oo kale ayaa jooga si ay u caawiyaan maamulka si **loo taxgiliyo waxa adiga kuugu fiican.**





# Xasuusnow



- Waxaad heli doontaa **warqad rasmi ah** oo ay ku jirto go'aanka da'daada.
- Racfaan ayaad ka qaadan kartaa haddii aad u malaynayso in da'daada si khaldan loo qiimeeyay!
- Waa inaad **racfaan kaqaadataa** waxyar ka dib marka aad hesho warqadda go'aanka.
- Marwaliba **weydi su'aalo** marka aanay wax kuu kala caddeyn.



# SOOJEEDINTA U DAMBEYSA

Xasuuusnow, haysashada dukumeenti rasmi ah oo kuqoran taariikhda dhalashadaada uu muhiim kuugu yahay sababo badan. Waxay kaa caawin doontaa inaad dugsi dhigato, tusaale ahaan, oo aad la noolaato dhalinyarada kale ee aad isku da'da tiihin.

Haddii aad imaaday Yurub adiga oo wadan dukumeentiyo caddeynayo da'daada, kaqeybqaadashada habraaca qiimeynta da'da ayaa ku caawini kara.

Xasuuusnow, keligaa ma tihid inta uu socdo hannaankan. Saraakiisha ka shaqeeya meesha aad ku noosahay ayaa halkaasi u jooga inay ku caawiyaan.

Marwaliba weydii caawimaaad haddii aad u baahan tahay taageero ama wax aanay kuu kala caddeyn!







Ugu dambayntii, sidoo kale la soco in gudaha Yurub ay ka jiraan **xeerar iyo shuruuc carruurta ka ilaaliya** shaqaaqada iyo waxyeelada.


Dhammaan wadamada Yurub waxay qayb ka yihiin Shirka Xuquuqda Carruurta ee inta badan loo yaqaan CRC. CRC waa dukumeenti faahfaahinayo xuquuqda carruurta iyo waxa looga baahan yahay in dawladuhu sameeyaan si carruurtu u badbaadaan, loo ilaaliyo oo ay ugu noolaadaan guud ahaan nolol wanaagsan.

CRC kaliya ma khuseyso carruurta u dhashay dalka aad ku sugar tahay balse waxay khuseysaa dhammaan carruurta, oo ay ku jiraan kuwa imaanaya Yurub.

Haddii aad hadda rabto inaad is tijaabiso oo aad aragto inta aad ka xasuusato hannaanka qiimeynta da'da, sii wado su'aalaha gaagaaban ee kuyaala bogga xiga. Baashaal wacan!



# SUA'ALAHQIIMEYNTA DA'DA



**Su'aasha 1aad.** Ma xasuusan kartaa wax xuquuq ah oo ay caruurtu leeyihii inta lagu jiro habraaca qiimeynta da'da? Tiri kuwa aad ka xasuusan kartid.

**Su'aasha 2aad.** Ma xasuusataa qaababka kala duwan ee loo qiimeeyo da'da wadamada Yurub?

**Su'aasha 3aad.** Sidee ayuu masu'ul kuu caawin karaa?

**Su'aasha 4aad.** Suurtagal ma tahay in saraakiisha ama dhakhaatiirta aysan isku raaci karin da'da ama ay khaldaan da'da? Hadday haa tahay, maxaad samayn kartaa?



**Su'aasha 5aad.** Ma xasuuusataa micnaha 'danta u fiican ee canuga'?

SI WANAAGSAN, WAXAAD KA JAWAABTAY DHAMAAN SU'AALAHAA!

KA HEL JAWAABAHA BOGGA XIGGA.

# JAWAABAHA SUA'ALAH



## JAWAABAHA SU'AASHA 1AAD

- Xuquuqda aad u leedahay in lagu maqlo
- Xuquuqda aad u leedahay inaad yeelato taariikh dhalasho (muhim u ah habraacyada dheeraadka ah)
- Xuquuqda ilaalinta
- Xuquuqda aad u leedahay in lagu siiyo taageero  
dheeraad ah inta aad ilmaha tahay (tusaale meel  
nabdoon oo aad seexato/wax kabarato)
- Xuquuqda aad u leedahay in wax laguu sheego
- Xuquuqda aad u leedahay inaad su'aalo weydiiso
- Xuquuqda aad u leedahay inaad tiraahdo MAYA (marka lagu weydiyo inaad  
si buuxda iskaga bixiso dharka inta lagu jiro baaritaanka caafimaadka)
- Xuquuqda aad u leedahay mas'uul ku taageero
- Xuquuqda aad u leedahay inaad doorato jinsiga lab/dhedig dhakhtarka  
kugu sameynaayo baaritaanka
- Xuquuqda aad u leedahay inaad racfaan ka qaadato go'aanka

### **JAWAABAHA SU'AASHA 2AAD**

- Wareysiga hore ee sarkaalka
- Qiimeyn ta cilmi nafsiyed ee uu qaado  
khabiirka cilmi-nafsiiga ama shaqaale bulsho
- Baaritaan caafimaad oo uu qaadayo dhakhtar (sida, hubinta ilkaha, miisaanka iyo dhererka)
- Raajo, hadii loo baahdo

### **JAWAABAHA SU'AASHA 3AAD**

- Inaad hesho mas'uul ku taageero oo ku caawiyo inta habraaca hawsha lagu jiro
- Inaad su'aalo weydiiso oo aad hesho turjumaan kuugu sharaxo luuqad aad fahmeyso
- Si aad u doorato in dhakhtarku yahay dhedig ama lab

### JAWAABAHA SU'AASHA 4AAD

- Marka aysan da'du kala cadeyn saraakiishu waa inay doortaan da'da yar (faa'iidada shakiga)
- Wuxaad xaq uleedahay inaad ka qaadato racfaan natijjada qiimeynta da'da

### JAWAABAHA SU'AASHA 5AAD

- Dhammaan tallaaboooyinki la qaaday inta uu socday hannaanka qiimeynta ayaa loo sameeyey si loo xaqijiyo danaheyga ugu fiican, tani waxay kadhigan tahay in masuuliyiintu ay had iyo jeer maanka kuhayaan waxa u fiican ee danaha ii ah. Tani waxay ka dhigan tahay ficilladu inay ahaadaan kuwa iileh caawin. Waan garawsanahay, haseyeeshee, in tani aysan kadhigneyn in mas'uuliyiintu ay fuliyaan dhammaan rabitaannada laga yaabo inaan qabo.



**Waxaa in badan loo  
mahadcelinaya dhammaan**  
**carruurti** iyo dhalinyaradi  
kadhiibtay ra'yigooda  
kusaabsan muuqaal-  
gacmeedka qiimeynt da'da  
ee carruurta. Buug-yarahen  
waxa uu ka yimid soo  
jeedintiina si loo helo  
buugyare taageero dheeraad  
ah lagu siiyo oo loogu  
wargeliyo dadka da'da yar ee  
soo codsanaya inay fahmaan  
waxa qiimeynta da'du tahay  
yo sida wax ku oolka ah ee  
looga qeyb qaato  
hannaankan.





Publications Office  
of the European Union